

# Xubin noqo!

**Ururrada ka jira dalka Swidhan way tiro iyo firfircooni badan yihiin** Sidee bay taasi ku dhacday? Maxaa sabab u ah in dadku xubin ka noqdaan ururrada? Sidee bay ururradu u shaqeeyaan? Waxaan hoos kaga jawaabaynaa suaalaha kor ku xusan.

## **Ururradu waa goob kulan!**

Ka qaybgalka ururrada way u furan tahay qof walba. Taasi waxay tahay in dadkoo dhan xaq u leeyihiin inay ka mid noqdaan ururrada ku hawlal arrimaha ay daneynayaan. Isla markaa waxaa suura gelaya kulanka dadka isku danta ama isku dooqa ah.

## **Jiritaanka ururradu waa iskaa-wax-u qabso**

Taas macneheedu waxay tahay in

xubnaha – yar iyo wenba – ay ka hawl galaan ururka waqtiga ay firaqaada yihiin mushaar la´aan.

## **Ka qayb qaadashada waalidka aad bay muhiim u tahay**

Si ay meelmar u noqoto hawlaha loo qabanayo carruurta iyo dhalinyarada waxaa lama huraan ah ka qayb qaadashada waalidiinta nolosha iyo hawlaha ururrada. Kaalinta waalidka waxay ahaan kartaa inay mararka qaarkood u raacaan ubadka ciyaaraha sida tan barafka, tan dabbaalashada ama tan duur u bixidda. Kaalintaasi aad bay muhiim ururrada ugu tahay, taasoo xubnuhu mushaar la´aan ku hawlgalaan waqtigay firaqaada yihiin.

## **Horjooge iyo tababare niyad iyo xiise hawsha u haya**

Hawlaha la xiriira fardafuulidda, shax ciyaaridda ama dhaqdhaqaaqa ka socda xeryaha waxaa mar walba ka dambeya horjogeyaal iyo tababarayaal dhalinyarada goor walba garaab taagan. Waxay hureen waqtigooda si ay u meel-mariyaan xilka iyo masuuliyada ay dhabarka u dhigteen. Taasi waxay tusaale lagu daydo u noqon dhalinyarada Isla markaasna waxay yihiin laf dhabarka ururka.

## **Nolosha ururka waxay ku saleysan tahay xubnihiisa**

Firfircoonida iyo hawl-karnimada xubnaha ururka waa halbowlaha ururka. Dhaqaalaha ururka ka soo gala xubnihiisa waxay tahay mid

aad muhiim u ah maadaama ay saldhig u tahay dhaqaalaha ururka. Mararka qaarkood ururadu waxay kaalmo ka heli karaan deg-moyinka (komuunnada) iyo heyadaha kale. Dhaqaalaha sidaas ururka ku soo gala waxaa lagu bixiyaa kirada iyo qalabka.

## **Xubnahu waxay ka mid yihiin inta goaanka leh**

Ururrada waxay ku dhisan yihiin hab "demokratig" ah. Taas macneheedu waxay tahay in xubin kastaa ay ka qayb qaadan karto doodaha iyo goaammada saameynaya hawlaha ururka. Sannadkiiba hal mar ayaa la qabtaa shir-weyanaha ururka oo lagu qiimeynayo hawlihii sannadkii hore; isla markaana waxaa la goaaminayaa hawlaha iyo dhaqaalaha ururka. Waxaa kaloo shirkaas lagu dooranayaa guddiga uruka maamulaya ilaa shir-weynaha

sannadka dambe. Guddiga ururka waxay kaloo ilaalinayaan in dhammaan xubnaha ururka ka tirsan u hoggansanaadaan xeerka ururka u degsan. Xeerku waa nidaam qoran oo tilmaamaya hawlaha iyo ulajeedoyinka ururka oo la oran karo sharciga ururka.

## **Ururrada iskaa wax u qabso ee Iswiidhan ka dhisan**

Ururrada ka dhisan Iswiidhan qaarkood waxaa la aasaasay boqol sano ka hor iyo intii ka dambaysay. Waxaa ugu tira iyo dhaq-dhaqaaq badan ururrada ciyaaraha kala duwan. Waxaa kalo jira ururrada dhaqanka oo ku hawlal riwaayadaha, muusikada iyo qoob kaciyaarka. Intaas waxaa dheer ururrada hawageddiska, kuwa diimeed, kuwa xuquuqda dadaka kuwa xuquuqda carruurta iyo kuwa difaaca degaanka.

